

Qiimeynta Degaanka ee Khadka Dahabiga Ah ee METRO

















Aqoonsiga waxyaabaha laga gaarayo iyo ku wa saameynta ku yeelan kara degaanka, bulshada, ganacsiga oo ah qeyb muhim ah ee mashruuca Basaska Dheereya (RBT) ee Khadka Dahabiga ah ee METRO. Si qiimeyn loogu sameeyo saameyntaas ee Khadka Dahabiga ah ee la soo jeediyey, waxaa la sameynayaa qiimeynta degaanka (EA).

Waa Maxay Qiimeynta Degaanka?

EA waa warbixin kooban ee ay waaajib ka dhigtay dawladda sida uu dhigayo Sharciga Qaran ee Xeerarka Degaanka (NEPA) kaasoo lagu qiimeeyo saameynta iyo waxyaabaha laga gaarayo mashariicda. Ujeedada laga leeyahay EA waa:

- Xaqiijinta in mashruuca lagu talinayo waafaqsan yahay sharciyada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka.
- Qiimeynta waxyaabaha la xiriira degaanka, bulshada, dhaqaalaha iyo gaadiidka ee laga gaarayo iyo saameynta uu yeelanayo dhismaha mashruuca iyo hawlgalkiisa.
- Garashada xalka looga digtoonada, yareeyo ama xadido saameynta.
- Wargelinta hay'adaha dawladda dhexe iyo gobol saameynta uu yeelanayo mashruuca lagu talinayo taasoo qeyb ka ah go'aan gaarista.

Mudada lagu jiro horumarinta EA ee mashruuca Khadka Dahabiga ah, shaqaaluhu waxa ay qiimeynayaan faa'iidada iyo saameynta la xiriirta:

 Saameynta dabeecadda/ muuqaalka	 Goobaha fasaqowgu ku dhacay	 Hantida ma guurtada ah	 Ciidda
 Tayada hawada	 Dhismayaasha taariikhiga ah	 Xayawaanka sii dabar go'aya iyo kan sharcigu ilaaliyey	 Gaadiidka
 Ganacsiga	 Isticmaalka dhulka	 Sawaxanka	 Biyaha
 Waxyaabaha bulshadu ka kooban tahay	 Jardiinooyinka	 Amaanka	 Xayawaanka duurjoogta ah

Sidee ayaad uga qeyb qaadan kartaa Qiimeynta Degaanka?

Shaqaalaha mashruuca ayaa isu ururinaya natiijada kuna soo qoraya warbixinta EA oo ay eegayaan hey'adaha dawladda dhexe, gobol iyo degaanka. Marka warbixinta la daabaco waxaa jireysa muddo ay dadweynuhu ra'yigoodu kaga dhiiban karaan oo akhrin karaan warbixinta EA soona gudbin karaan ra'yigooda iyo su'aalaha ay qabaan.

- Warbixinta EA waxaa laga heli karaa bogga internetka ee mashruuca.
- Warbixinta EA oo daabacan si ay dadweynaha u arkaan waxa ay ka heli karaan goobo gaara (tusaale ahaan, maktabadaha, xafiisyada dawladda) ee goobaha mashruuca marayo.
- Kulan dadweynaha u furan ayaa la qabanayaa ii inta daneyneysa lagu wargelinayo warbixinta EA oo ay kula hadli karaan su'aalana weydiin karaan shaqaalaha mashruuca.
- Waxa kale oo dadweynuhu ra'yigooda ku dhiiban karaan iyaga oo ku soo gudbin karta boostada ama iimeylka.



Wetland field walk

Maxaa laga yeelayaa aragtida daweynaha?

Ra'yiga dadweynaha ee la soo ururiyey waxaa loo gudibiyaa Hay'adda Maamulka Gaadiidka ee Dawladda Dhexe (FTA) iyo Maamulka Magaalooyinka, iyo hay'adaha dawladda dhexe iyo gobolka ee safka hore kaga jira Khadka Mashruuca Dahabiga ah.



Muunadda ciidda ee Degaanka

Sidee ayaa Qiimeynta Degaanku qeyb uga noqoneysaa go'aan gaarista?

Ka dib marka la akhriyo ra'yiga la soo ururiyey ee ku saabsan EA, FTA waxa ay gaareysaa go'aan jawaab u noqon kara dhamaan ra'yiga dadweynaha ee la isku keenay iyada oo cadeyneysa sidoo loo yareyn lahaa oo loo xadidi lahaa saameynta. Qoraalkaasi waxa uu noqonayaa mid lagu go'aamiyo in aan loo baahanneyn in la sameeyo daraasad dheeraad ah (oo lagu magacaabo Ogaashaha Saameyn aan la Taaban Karin (FONSI) ama in loo baahan yahay daraasad dheeraad ah oo ku saleysan Saameynta Degaanka (EIS). Gudiga maamulka Magaalooyinka waxa ay soo saarayaan qoraal kaas la mid ah oo ku wajahan sharciyada degaanka ee heer gobol.

Haddii ay FTA soo saarto FONSI, waxaa suurogal ah in mashruuca khadka Dahabiga ah la siiwado sida dhameystirka naqshadeynta iyo diyaarinta hawlaha la xiriir injineeriyada iyo u diyaargarowga dhismaha. Haddii la soo soorayo EIS, waxaa loo baahanayaa in la sameeyo daraasad dheeraad ah oo ku saabsan saameynta la taaban karo ee degaanka, bulshada iyo dhaqaalaha. Talaabooyinka la qaadayo si looga digtoonaado, yareeyo ama xadidio waa in lagu caddeeyaa EIS lana siiyaa hay'adaha fursad ay dib ugu eegaan daweynuhuna ra'yigooda ka dhiibtaan.

LA SOCO!

Qor iimeylkaaga si laguugu soo diro xogtii ugu dambeysay:

www.metrotransit.org/gold-line

Nagula soo xiriir iimeylka: goldline@metrotransit.org

Naga soo wac: 651-602-1955

Nagala socio:

 @GoldLineBRT

 @MetroTransitMN

If you need this information in an alternative format or language, contact:

- Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:
- Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:
- Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xiriir:
- နမူနာသေးဆိုင်ခိုးနဲ့ဘဉ်တော်ရိုတ်ကျိတဖဉ်အံလတံခံမံအကျိလတံကယုထာတမံအံအတိုမုတမံကျိဉ်ဆဲးကျါ

Liz Jones, Community Outreach Coordinator | 651-602-1977 • elizabeth.jones@metrotransit.org